



Orientation to Ontario

DHALINTA

Waxaa jira adeegyo badan oo gaar u ah carruurta, dhallinta iyo da'yarta qaangaarka ah ee ku dhaqan Ontario. Ururo badan iyo wakaaladaha dawlada ayaa bixiya caawimaad ku aadan waxbarashada, shaqada, mutadawacnimada, caafimaadka, iyo arimaha bulshada.

- NewYouth.ca waa shabakad oonleen ah oo loogu talagalay dhallinta wadanka ku cusub ayna ka helayaan xog ku saabsan dugsiga, shaqada, caafimaadka iyo socdaalka. Waxaad sidoo kale ka haysaa musaabadaha dadka dhalinyarada ah ee gobalka oo dhan leeyihiin iyo liiska tiro deeqaha waxbarashada, deeqaha iyo tacliinta bilaashka ah oo ay heli karaan dhallinta wadanka ku cusub newyouth.ca
- Youth Opportunities Ontario waxay xog ka bixisaa shaqada, waxbarashada, barnaamijyada bulshada iyo mutadawacnimada gobalka oo dhan youthconnect.ca

WAXBARASHADA

Dhallinta reer Ontario waa inay dhigtaan dugsiga ilaa da'da 18 sano, ama ilaa ay ka dhameeyaan shahaadada dugsiga sare. Waxaa jira nidaamyada kaladuwan ee waxbarashada oo laga heli karo Ontario. Dugsiyada sare ee Ontario kuma waydiin kartaa dukumiintiga aad wadanka kusoo gashay marka lagu diiwaan gelinaayo. Barnaamijka Waxbarashada Wada Shaqaynta Dugsiga Sare (co-op) ayaa u sahlaya ardayda inay helaan dhibco ay ku gaarayaan shahaadadooda dugsiga sare ayagoo baranaaya khibrad shaqo. Ardayda C=op ayaa sidoo kale bilaabi kara tababarka shaqada ee ganacsiyada oo ay ka helayaan

Barnaamijka Tababarka Shaqada ee Dahlinta Ontario(OYAP) tcu.gov.on.ca ama findlink.at/oyap

Ontario waxay leedahay in ka badan 40 kuleejyada iyo jaamacadaha dawlada maalgeliso ah.

Waxaa sidoo kale jira in ka badan 400 oo kuleejyada xirfada ah oo gaar loo leeyahay kuna yaala gobalka.

Xog badan ka ogoow waxbarashada kuleejka tcu.gov.on.ca ama findlink.at/findschool

Ciidanka Qalabka sida ee Canada ayaa bixiya fursadaha kaladuwan ee waxbarashada iyo xirfada ee ragga iyo dumarka da'yarta ah. Hase yeeshee, waa inaad tahay muwaadin Canadian ah si aad ugu biirto ciidanka qalabka sida.

SHAQADA

Shaqada dhallinta ayaa ah walaac wayn oo ka jira Ontario: Waxaa jira ururo iyo wakaalado badan oo ka caawiya dhallinta helitaanka shaqooyinka waqtiga kooban iyo barashada fursadaha xirfadaha.

Webseedka Barnaamijka Shaqooyinka Dhalinyarada waxaa ku jira liiska shaqooyinka, xirfadaha tababarka iyo taageerooyinka shaqo abuurka kuwaasoo ay heli karaan dhalintu laguna saleeyo da'da iyo aqoonsiga oo laga helaayo Ontario ontario.ca ama findlink.at/yjprogr

XUQUUQAHA IYO BADQABKA SHAQADA

Da'yarta ayay labo jibaar u badan tahay inay ku dhaawacmaan goobta shaqada. Xog badan ka ogoow badqabka goobta shaqada oo aad ka helayso webseedka Adeegyada Dawlada Canada ee dhallinta: youth.gc.ca ama

1-855-626-0002

<https://orientationontario.ca>



Funded by / Financé par :



Immigration, Refugees and Citizenship Canada

Immigration, Réfugiés et Citoyenneté Canada

findlink.at/jobsafe

Wasaarada Shaqaalaha ee Ontario ayaa bixinaysa xog ku aadan xuquuqdaada ka shaqaale ahaan: ontario.ca ama findlink.at/youngwork

LA SHAQAYNTA IYO MUTADAWACNIMADA DHALINTA

Xarumo badan oo bulsho ayaa baxsha barnaamijyada dhallinta, ayna ku jiraan naadiyada, kulannada bulshada, ciyaaraha iyo nashaadaadka jirdhiska iyo doorka bulshada.

- Onleenka ka fiiri ururada deegaankaaga ama la xariir wakaalada dib u dejinta ee deegaankaaga: newyouth.ca ama findlink.at/youth
- Si aad xog uga ogaato kooxaha dadka u dooda, booqo newyouth.ca ama findlink.at/youthadvoc

Mutadawacnimadu waa qaab wanaagsan oo aad kula kulmayso dadka, ku baranaysa xirfado cusub aadna ku baranaysa deegaankaaga.

Xog badan a ogoow samaynta shaqooyinka tabarugaada ah Ontario Youth Volunteer Challenge: ctw.ovcn.ca

CADAALADA DHALINTA DANBIYADA GASHA

Nidaamka cadaalada dhalinyarada ayaa ka duwan nidaamka maxkamadaha caadiga ah. Marka dhallinta da'aha u dhexeeya 12 iyo 17 ay sharciga jebiyaan, booliiska ayaa adeegsan kara xeelado kaladuwan si xal loogu helo xaalada. Dhallinta gala danbiyada ayaa digniin ka heli kara booliiska ama waxaa loo gudbin karaa barnaamij bulsho. Kiisaska daran, dhalinta ayaa lagu xukumida karaa danbi waxaana la gayn doonaa maxkamad.

HELITAANKA CAAWIMAAD

KidsHelpPhone waa adeega talo bixinta oo qarsoodi ah qarinaayana sirtooda loogu talagalay dhalinta da' kasta. Waxaad wici kartaa laynkooda tooska ah ee 24 saac shaqeeya ama waxaad su'aalaha kusoo gudbin kartaa oonlaynka. KidsHelpPhone ayaa kaa caawin karta arimaha maalin kasta sida shukaansiga, cadaadiska dhalinta kale iyo arimaha daran sida caafimaadka dhimirka, xadgudubka, iyo gardarada. Wac [1-800-668-6868](tel:1-800-668-6868) ama booqo kidshelpphone.ca Si aad xog badan uga ogaato sida KidsHelpPhone ay u caawin karto carruurta iyo dhalinta, booqo New Youth oo aad ka helayso newyouth.ca ama findlink.at/kidshelp.

MA OTAHAY?

- Waxaad codsan kartaa ruqsada G1 marka aad gaarto 16 sano.
- Waxaad codsan kartaa Ontario Works marka aad gaarto 16, marka aad buuxiso shuruudo gaar ah.
- Waxaad codsan kartaa daymaha ardayda ee Barnaamijka Caawimaada Ardayda ee Ontario (OSAP) haddii aad tahay arday si buuxda u dhigta dugsiga sare.
- Waxaad ka codayn kartaa doorasooyinka dawlada ee magaalada, dawlada gobalka, iyo federaalka marka aad gaarto 18 sano.
- Waa inaad gaartaa 19 sano si aad u iibsato maadooyinka tubaakada gudaha Ontario.
- Waa inaad gaartaa 19 sano si aad uga iibsato una cabto khamro gudaha Ontario.

